



## **Barxadaha Hay'adda EPA Nadiifineyso iyo Meelaha Lagu Qabanayo Tijaabayn**

**Goobta Ciidda Fadaraysan ee Xaafadda Koonfurta Minneapolis**  
Minneapolis, Minnesota  
Abriil 2005

### **Macluumaad dheeraad ah**

Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan nadiifinta ama hawlaha mustaqbalka ee goobta laga qabanayo, fadlan kala xiriir mid ka mid ah xubnaha kooxda qaabilsan goobta hawsha ee ku qoran liiska hoose:

#### **Cheryl Allen**

Isuduwaha EPA Community Involvement  
(312) 353-6196  
allen.cheryl@epa.gov

#### **Mary Logan**

Maamulaha Mashruuca Daaweynta ee EPA  
(312) 886-4699  
logan.mary@epa.gov

#### **Ken Rhame**

Isuduwaha Goobaha Shaqada ee EPA  
(312) 353-6720  
rhame.kenneth@epa.gov

EPA toll-free: (800) 621-8431

#### **Robert Anderson**

MDA Maamulaha Mashruuca  
(651) 297-5731  
Robert.Anderson@state.mn.us

Waxaa kale oo dib ugu noqon kartaa feylasha mid ka mid ah macluumaadka hoose ku qoran:

#### **Green Institute**

2801 21<sup>st</sup> Ave. S., Suite 100  
Minneapolis

#### **Minneapolis Public Library East Lake Branch**

2727 E. Lake St.  
Minneapolis

Hay'adda Badbaadinta Degaanka Maraykanka (U.S.) waxay dhowaanahan ka nadiifisay ciida sunta ah ee wasakhaysan deydaha lagu nasto ee 29 guryo ee ka tirsan Minneapolis. Mashruucan oo bilowday bishii Oktoobar dhexdeeda dhamaadayna 2da bishii Diseembar, Shaqaalaha hay'adda EPA waxay ka qodayn ciida waxayna u qaadeen goob la ansaxiyey ee qashinka lagu daadiyo oo ay ku taalo Elk River, Minn., oo loogu talagalay qashinka. Ciid nadiif ah ayaa lagu baddelay ciidii wasakhaysnayd.

Dhulkaasi waxa uu ka mid yahay qeyb ka tirsan waxa loo yaqaano Goobta Xaafadda Ciida Wasakhaysan (goobta) ee Koonfurta Minneapolis. Ilaa 400 guryo ayaa hay'adda EPA iyo hay'ado kale baareen sanadihii la soo dhaafay. Sanbalo ciida ah oo si taxana ah loo qaaday ayaa aakhiritaankii lagu arkay sun heerar sare oo ciidaasi ka koobanaayeen ee lag baaray 29 waar ee daydka lagu nasto ee guryaha, waxaana looga baahday hay'adda EPA in ay ka qaado ciida barxadaasi.

### **Kulan, wareysiyo oo caawin doonaan qorshaha hay'adda EPA**

Hay'adda EPA waxay haatan ka shaqeyneysaa qorshaha mustaqbalka ee Goobta. Si ay u hesho caawinaad ku saabsan ururinta macluumaad dheeraad ah, hay'adda EPA waxay dadka deggan xaafadda u ballamisay dood furan ee la qabanayo 20ka bisha Abriil iyo wareysiyo taxana ah, doodana waxaa la qabanayo 20ka bisha Abriil (saacadda 1:30 duhurnimo ilaa 4:30 galabnimo) iyo 21ka bisha Abriil (saacadda 10 subaxnimo ilaa 2 duhurnimo iyo 4ta galabnimo ilaa 6 fiidnimo) waxaana lagu qabanayo Oliver Presbyterian Church. 2467 Bloomington Ave. S. Haddii aad qabtid wax faallo ah, ama aad dooneysid ballan u dhigatid wareysiga, wac (866) 955-1543, ama waxaad e-mail u dirtaa allen.cheryl@epa.gov.

EPA waxay filaysaa in ay qaado wareeg lagu ururuinayo sanbalada baaritaanka ciida ee Goobta xilligan guga iyo xagaaga. Guud ahaan qorshaha talaabada waxaa lagu bixin doonaa nadiifin dhaqso ah – sida mashruuca dayrta – haddii ciida laga helo sun aad u sareysa, waxaana lagu calaamadeyn doonaa meesha ciida laga qaadayo isticmaalka taariikhda baarista sanbalka si loo go'aamiyo in ciida la nadiifiyo mustaqbalka.

Hay'adda EPA iyo Waaxda Beeraha ee Minnesota waxay si wadajir ah ugu shaqeynayaan si ay u helaan Goobta hawsha laga sameynayo ee Liiska Superfund National Priorities List. Qeybta NPL waxay hay'adda EPA ka caawineysaa go'aaminta meelaha loo fasaxayo in lagu sameeyo baaritaan dheeraad ah.

### **Waxa ku saabsan Goobta Hawsha laga qabanayo**

Qeybta Barxada CMC Heartland Lit (qeybta dhirta) waxay ku fadhidaa 5 eekar (5 acres) waxayna ku taalaa geeska waqooyi-galbeed ee is-gooyska Wadada Hiawatha iyo Wadada 28aad. Hay'ado dawr ah ayaa u soo saaray suntan cayayaanka goobta hawsha laga bilaabo 1938 ilaa 1968. Markii laga helay ciida goobta sunta arseenikada ah, hay'adaha caafimaadka waxay ku tuhmeen in ay dabeesha ay xaafadaha dhow u keentay boodh wasakhaysan. Barxadaha lagu nasto ee goobta hawsha ee waqooyi iyo galbeed ayaa lagu sameeyey baaritaan ciida la xiriira. Marka Waaxda MDA ay xaqiijisay suntan arseenikada in ay ciida qaar ka mid ah dhismooyinka laga helay, hay'adda waxay EPA weydiisatay caawinaad lagu nadiifinayo wasakhda taabatay ciida.

Kuwa ka mas'uulka ah wasakhda ciida taabatay ee goobta hawsha ayaa nadiifinaya ayaga oo raacayo hor-joogaha MDA. Hay'adda EPA waxay sanbalo dheeraad ah ka qaadi doonaan goobta Ciida Wasakhaysan ee Xaafadda Koonfurta Minneapolis. Natijada laga helo sanbalka ciida, hay'adda EPA waxay soo jeedin doontaa nadiifinta goobta Hawsha.

### Taariikho Muhim ah

Bisha Meey 2001	Ayada oo la tixraacayo warbixinta bisha Abriil 1999, Hay'adda qaabilsan Diiwaangelinta Waxyaabaha Sunta ah ee Cudurada keena, oo ay la shaqeyneyso Waaxda Caafimaadka Minnesota oo ay bixiso la talinta caafimaadka khuseeya waxa ku saabsan wasakhda boodhka ciida oo heer sare ah oo ay ku soo daadato Goobta Barxadda ee CMC Lite waxayna waxyeleynaysaa nawaaxiga dadka deggan ilaa waqooyi-galbeed.
Bisha Juun 2001	Hay'adaha MDA iyo MDH waxay ka ururiyeen lambar xadidan ee sanbalada ciida meesha dadka deggan. Natiijada sanbalka waxay caddeysay in baaritaan dheeraad loo baahanyahay in la sameeyo.
Bisha Setembar 2003	Hay'adda MDA sanbalo dheeraad oo ciid ah ayey ka ururisay meesha dadka degganyahay.
Bisha Janaayo 2004	Hay'adda MDA waxay weydiisay EPA caawinaad la xiriirta suntan ciida wasakhaysan ee Goobta Xaafadda Koonfurta Minneapolis.
Bisha Meey ilaa bisha Oktoobar 2004	Hay'adda EPA waxay ka ururisay sanbalo ciid dheeraad ah dhismooyinka Goobta hawsha. Sanbalada waxaa lagu aqoonsaday 29 dhismo ee laga helay xaddi sare ee sunta arseenikada.
Xilliga Dayrta 2004	Hay'adda EPA waxay ciid ka qoday 29 dhismo ee laga helay ciidda xaddi sare ee suntan arseenikada ah Ciida wasakhaysan waxaa lagu qubay meesha ama dhulka qashinka lagu qubo oo la ansaxiyey.



Region 5  
Office of Public Affairs (P-19J)  
77 W. Jackson Blvd.  
Chicago, IL 60604

FIRST CLASS

RETURN ADDRESS REQUESTED

**SOUTH MINNEAPOLIS NEIGHBORHOOD SOIL  
CONTAMINATION SITE: EPA Cleans Up Yards**



*Waxaa lagu daabacay Warqad Dib loo warshadeyn karo*